



Xafiiska Wasiirka

Tixraac: SSC/WM/XW/001/2024

Taariikh: Ogosto 1, 2024

XEER-NIDAAMIYAHA AJUUROOYINKA ADEEGGA GARSOORKA,

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeedooyinka lagu sheegay Qodobka 2(4) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee la xiriira dabagalka dakhliga;

Isagoo u hoggaansamaya mabda'a lagu sheegay Qodobka 3 (7) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda iyo hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo waxku'ool ah;

Markuu arkay Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, iyo Xeerka Tacrifadda Cashuuraha Berriga;

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 88(1) ee Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqangeliyo sharciyada dakhliga;

Wasiirka Maaliyadda wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

Qodobka 1aad

Jaangoynta Ajuurooyinka Adeegga Garsoorka

1. Ujuurooyinka iyo Khidmadaha lagu sheegay jaantusyada hoose ayaa noqon doona kuwo la dabaqayo marka uu dhaqan galo Xeer-nidaamiyahaan:

1.1 Ajuurooyinka Maxkamadda Degmada

Madax/Xige	Shaxda 1.1.1 Dacawadaha Waxyeelada Dadka	Qiimaha (\$)
	Xaqidda nabarka (Dubaaqo ama Jaa'ifo)	\$500
	Xaqidda nabarka (Haashimo iyo Munaaqalo)	\$350
	Xaqidda nabarka (Laf Caddaatay)	\$150
	Xaqidda nabarka (Wixii ka Hooseeya)	\$50
	Mag Dil	\$1000
	Ganaaxa Dilka kaska ah ee reeruhu heshiiyaan	\$500
	Xabsi Gadasho Kiis Dil ah (Maalintii)	\$6
	Xabsi Gadasho Kiis caadi ah (Maalintii)	\$4

Madax/Xige	Shaxda 1.1.2 Dacawadaha Dhulka	Jaanjooyin	Qiimaha (\$)
	Dacwadaha Cusub ee qiimihiisu yahay	\$1 - \$10,000	\$500
	Dacwadaha Cusub ee qiimihiisu yahay	\$10,001 - \$50,000	\$1,000
	Dacwadaha Cusub ee qiimihiisu yahay	\$50,001 - \$100,000	\$1,500
	Dacwadaha Cusub ee qiimihiisu yahay	\$100,001 - ka badan	2.5%
	Fulinta Dacwadaha Dhulka	Qiimaha Kiiska	1%
	Khidmadda soo Eegga Dhulka	Dhulka Magaalada	\$500
	Khidmadda soo Eegga Dhulka	Dhulka Dhow	\$400
	Khidmadda oo Eegga Dhulka	Dhulka Fog	\$250

Madax/Xige	Shaxda 1.1.3 Dacawadaha Qoyska	Qiimaha (\$)
	Dhaxalka Dadka Isdhalay/Isku Dhaxay	3%
	Dhaxalka Aabbaha (Ilaa 3 Oday)	5%
	Dhaxalka Aabbaha (Ilaa 4 Oday)	7%
	Dhaxalka Aabbaha (4 Oday kabadan)	10%
	Shahaadada Guurka	\$80
	Shahaadada Furiinka	\$80
	Gal furista Dacwadaha Qoyska	\$10

Madax/Xige	Shaxda 1.1.4 Dacawadaha Maamulka	Shatiga 1 Sano (USD)		
	Nooca Dacwadda	Darajada A	Darajada B	Darajada C
	Dacwadda Aan Wax Qiimo Ah Lahayn	15%	10%	5%
	Maamul Shirkado oo La Isku Haysto	15%	10%	5%
	Maamul Dugsi, Madarasad Ama Jamacad la Isku Haysto	15%	10%	5%
	Magac Shirkadeed oo La Isku Haysto	15%	10%	5%
	Calaamad Shirkadeed oo La Isku Haysto	15%	10%	5%
	Maamul Ama Lahaansho Urur (NGO) oo la Isku Haysto	15%	10%	5%
	Fulimaha aan Qiimaha Lahayn	\$200	\$150	\$100

	Shaxda 1.1.5 Dacawadaha Guud	Qiimaha (\$)
	Dacwadaha Deymaha	3%
	Heshiisyada (Agreement)	10%
	Cusboonaysiinta Heshiisyadda	5%
	Caddaynta Rahanka	\$50
	Caddaymaha Aan Qiimaha lahayn	\$40
	Tirtirka Rahanka	3%
	Dardaaranka	\$50
	Hibayn Shakhsi ah	3%
	Hibaynta ganacsi	3%
	Warqadda Caddaynta Dembi la'aanta	\$25
	Wakiilashada (Power of Attorney)	\$50
	Ansixin Caddayn Wakaaladeed (Marka Dib Loo Dirayo)	\$50
	Tasdiiqinta Caddaymaha	\$15
	Gal-furis madani/ dhaxal	\$30
	Shufca	2%
	Warqad Ogolaansho (Qayim)	\$30
	Caddayn Waalid/ Xanaaneeye	\$30
	Caddayn waxkabadalid baasaboar	\$20
	Caddayn dukuminti lumay	\$20
	Caddayn dhimasho	\$30
	Caddaymaha yaryar	\$20

	Burin Go'aan Guddi	\$200
	Ansixin Go'aan Xeerbeegti (Qiimo leh)	2%
	Ansixin Go'aan Xeerbeegti (Qiimo lahayn)	\$50
	Is Hortaag Fulineed	\$250
	Guri Ka Saaris (Heshiis ka Dhammaaday Kireystaha)	\$40

1.2 Ajuurooyinka Maxkamadda Gobolka

Madax/Xige	Shaxda 1.2.1 Ajuurooyinka Maxkamadda Gobolka	Qiimaha (\$)
	Gal furis Dacwadda Madaniga ah (halmar)	\$200
	Dacwad shaqaale	\$30
	Fulin	1%
	Sugitaan Mulkiyad	\$300
	Dacwadaha gaagaaban	\$250
	La wareegid dammaanad taalay	\$20
	Xabsi Gadasho Kiis Dil ah (Maalintii)	\$6
	Xabsi Gadasho Kiis caadi ah (Maalintii)	\$4

1.3 Ajuurooyinka Maxkamadda Rafcaanka

Madax/Xige	Shaxda 1.3.1 Ajuurooyinka Maxkamadda Rafcaanka	Qiimaha (\$)
	Gal-furis Madani (dacwad katimid gobolka)	\$200
	Gal-furis Madani (dacwad katimid degmooyinka)	\$100
	Ansixin Wakaalad	\$20
	Diiwaangelinta hantida maguurtada ah	\$20
	Diiwaangelin Rahan	\$30
	Diiwaangelinta shirkadaha	\$50
	La wareegid dammaanad taalay	\$20
	Xabsi Gadasho Kiis Dil ah (Maalintii)	\$6
	Xabsi Gadasho Kiis caadi ah (Maalintii)	\$4

1.4 Ajuurooyinka Maxkamadda Sare

Madax/Xige	Shaxda 1.4.1 Ajuurooyinka Maxkamadda Sare	Qiimaha (\$)
	Gal-furis Madani	\$200
	Gal-furis Idaari	\$300
	Gal-furis Dacwad Shaqaale	\$30
	Dib U-eegis	\$300
	Gal-furis Dacwad Doorasho	\$2,000
	Gal-furis Dacwad Dastuuri ah	\$1,000
	La wareegid dammaanad taalay	\$20
	Xabsi Gadasho Kiis Dil ah (Maalintii)	\$6
	Xabsi Gadasho Kiis caadi ah (Maalintii)	\$4

1.5 Ganaaxyada

Madax/Xige	Shaxda 1.5.1 Ganaaxyada	Qiimaha (\$)
	Cashuur ka been sheegida	\$300
	Ka daahida qaadashadda Shatiyadda Dowladda	30%
	Bixin La'aanta Cashuurta	10%
	Is hortaagid go'aan cashuureed	\$1000
	Been abuurid qoraalladda cashuuraha iyo shahaadooyinka	\$500
	Cashuur La dhuumasho (Cashuurta lala dhuuntay)	25%
	Ku guuldaraysiga in lasoo caddeeyo cashuurta	\$100
	Qarinta ama yareenta cashuurta dhabta ah	10%
	Ilaalin la'aanta documentiyadda cashuuraha	\$200
	Is hortaagga Fulinta Cashuuraha	\$100
	Muddo-dhaafka Cashuur Bixinta	2%

	<i>Diidmada Qayaxan ee Cashuurta</i>	\$150
	<i>Ganaaxa Badeecadda Barmuudada ah</i>	30%
	<i>Ganaaxa Gaadiidka Barmuudada ah (Qiimaha uu markaa joogo)</i>	20%
	<i>Ganaaxa Darawalka (Xadhig 2 bil iyo \$1000)</i>	1000
	<i>Xukunka Xeerarka Cigaabta ku jira oo laga heshiiyey</i>	\$300
	<i>Xukunka Xeerarka Cigaabta aan ku jirin oo laga heshiiyey</i>	\$150
	<i>Baabuurta Khamriga Lagu Qabto</i>	10%
	<i>Ganaaxa Hubka lagu Geysto Fal dambiyeed</i>	10%
	<i>Xabsi Gadasho Kiis Dil ah (Maalintii)</i>	\$6
	<i>Xabsi Gadasho Kiis caadi ah (Maalintii)</i>	\$4

Qodobka 2aad

Bixinta iyo Ururinta Ajuurooyinka iyo Khidmaddaha

1. Ajuuradda iyo Khidmadda waxaa ururinaya shaqaalaha/saraakiisha Wasaaradda Maaliyada ee loo idmay ee ku sugan Maxkamadaha, Wasaaradda Cadaaladda iyo degmooyinka.
2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaya ujuurooyinka iyo khidmaddaha waxaa la farayaa in ay ku shubaan lacagahaas akoonada Wasaaradda Maaliyaddu u cayintey dakhliga ajuurooyinka Garsoorka.

Qodobka 3aad

Nidaaminta Galalka Dacwadaha Saboolka ah

1. Maxkamadda Rafcaanka iyo Wasaaradda Maaliyadda oo iskaashanaya ayaa muddo bil ah kusoo saaray **Foomka Codsiga Dacwoodaha Saboolka ah**, kaas oo ka koobnaan doona aarimaha soo socda:

(b) Magaca iyo lambarka shakhsiga saboolka ah ee ajuurada laga dhaafay;

(t) Xog kooban oo ku saabsan nuuca dacwadda qofka saboolka ah;

(j) Xog kooban oo muujinaysa sababta ajuurada looga dhaafay;

(x) Caddadka lacagta ajuuradaha ee laga dhaafay; iyo

(kh) Lambarka galka dacwadda.

2. Qof kasta oo sabool ah waxa uu buuxinaya **Foomka Codsiga ee Dacwoodaha Saboolka ah**, waxaana ansixin doona Guddoomiyaha Maxkamadda ee dacwadu hortaalo, iyadoo **nuqul** ka mid ah foomka la ansixiyay loo geyn doono saraakiisha loo idmaday ee Wasaaradda Maaliyadda ee Maxkamadda ka hawlgala.

3. Saraakisha Wasaaraddu waxay u gudbinaayaan foomamka loo keenay oo dhan bishiiba mar Agaasimaha Waaxda Dakhliga iyo saraakiisha Cashuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda si uu u xisaabiyo qaddarka ajuurada ee la dhaafay, isagoona Wasiirka Maaliyadda la wadaagi doona warbixin billa ah.



Qodobka 4aad

Warbixinta Korjoogtenta Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha

1. Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay korjoogteysaa u hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyahaan, oo ay soo saartaa warbixin lix bilood ah oo ay la wadaageeyso Wasiirka Maaliyadda.

Qodobka 5aad

Dhaqangelinta Xeer-nidaamiyahaan

1. Xeer-nidaamiyaha Ajuurada Maxkamaddaha, iyo Khidmada Diiwangelinta & Midda Sanadlaha ah ee Qareennada waxa uu dhaqangelayaa taariikhda uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.
2. Nuqullada Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda iyo midda Maxkamadda Rafcaanka ah.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad

Wasiirka Maaliyadda SSC/Khaatumo

Saxeex: 

